

JAMHUIRIYADDA		SOMALILAND
<h1>FAAFINTA RASMIIGA AH</h1>		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE		اللشّرة الرّسمية لجمهوريّة صوماليلاند
XAFIISKA GARYAQANKA GUUD EE QARANKA, MADAXTOOYADDA JSL, HARGEYSA, <i>E-mail: Garyaqankaguud@gmail.com</i>		
Sanadka: 1aad	Cadadka: 8aad ee August	Taariikh: 01/09/2012
QIIMAH CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAH FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii kastaba SL. Sh.		

## TUSMADA CADADKA

<u>QAYBTA KOWAAD: XEERARKA</u>	Bogga
<b>BAARLAMAANKA IYO XEER</b>	
<b>NIDAAMIYAYAASHA:</b>	
<p>1) <u>Lifaqa Shanaad ee Xeerka</u>  <u>Doorashooyinka</u>  <u>Goleyaasha Deegaanka iyo</u>  <u>Madaxtooyada</u>  <u>Xeer Lr. 20/2001</u></p> <p>2) <u>SIXID: Lifaqa Afraad ee Xeerka</u>  <u>Doorashooyinka</u>    <u>Goleyaasha</u>  <u>Deegaanka iyo Madaxtooyada</u>  <u>Xeer Lr. 20/2001</u></p>	337 342

<b><u>QAYBTA LABAAD: XEER</u></b>	
<b>NIDAAMIYAYAASHA IYO</b>	
<b>DIKREETOYINKA</b>	
<b>MADAXWEYNAHA:</b>	
3) MAGACAABID,	
<b><u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0253/082012</u></b>	346
4) CAFIS MADAXWEYNE,	
<b><u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0254/082012</u></b>	348
5) Xeer Madaxweyne,	
<b><u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0256/082012</u></b>	355
<b><u>QAYBTA SADEXAAD:</u></b>	
<b>DIGREETOYINKA,</b>	
<b>WAREEGTOOYINKA, AMARADA</b>	
<b>IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA</b>	
<b>WASIIRADA, IWM</b>	
6) Wareegto, Wasiirka Arrimaha Gudaha	356
<b><u>QAYBTA AFRAAD: AMARADA &amp;</u></b>	
<b>GO'AANADA MAAMUL</b>	
7) <u>GO'AAN KOMISHAN Komishanka</u> <u>Doorashooyinka Qaranka Ogost 12, 2012</u>	360

QAYBTA SHANAAD:

**OGEYSIISYADA**

*Sooma bixin*

QAYBTA KOWAAD:

**XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER  
NIDAAMIYAYAASHA:**

JSL/M/XERM/249-1260/082012

12/08/12

**XEER MADAXWEYN Lr:**

**0255/082012**

Dhaqan-galka Wax ka-bedelka iyo

Kaabista Xeerka Doorashada

Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka

Xeer Lr. 20/2001 lifaaqa shanaad

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Helay: Go'aanka Golaha Wakiilada JSL ee ku suntan GW/G/KF-Q11/563/2012 ee 11/08/2012 ee Go'aanka Ansixinta Waxka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqa shanaad;

WuxuuSoo Saaray

Dhaqan-galka Wax ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqa shanaad.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



← Ref: Gw/G/KF-Q/11/563/2012 →  
Date: 11/08/2012

Ujeedo:- Go'aanka Ansixinta Waxka-bedelka iyo Kaabista Xeerashada

Madaxtooyada iyo Golayaasha Deegaanka (XeerLr 20/2001) Lifaaqa 5aad

### GOLAHAD WAKILADA JSL

MARKUU ARKAY: Qodobka 4aad, Faq(1). 8aad, faq (1aad) 9aad faq(1) 22aad faq(2aad) iyo 111aad ee dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland.

MARKUU ARKAY: Digreeto No: JSL/M/SHGW/081-1244/062012 ee 04/08/2012 kuna saabsanayd Xeer Lr 20 /2001, Waxkabedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka lifaaqiisa 5aad .

MARKUU ARKAY: Go'aanka ansixinta iyo Wax kabedelka Xeerka Doorashooyinka lifaaqiisa 5aad Ee Golaha Guurtida kuna taariikhaysan 11/08/2012 eeg lifaaqa

MARKUU ARKAY: In Golaha Guurtidu wax ka bedel iyokaabis ku samaynin waxkabedelki iyo kaabistii xeerka Waxkabedelka iyo kaabista doorashooyinka lifaaqiisa 5aad xeer Lr. 20/2001 kuna ansixiyeen sidii Golaha Wakiiladu ugu gudbiyeen

### WUXUU


Golaha wakiilada JSL halkan ugu soo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland Wax-Kabedelka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Xeer Lr. 20/2001 lifaaqiisa 5aad, si uu uga guto waajibaadkiisa dastuuriga ah.

ALLAA MAHADLEH

C/risaaq Siciid Ayaanle.

  
Cirraaxmaan Maxamed C/Iaahi (Cirro)

Xog.Guud ee G/Wakiilada JSL

  
Gudoomiya Golaha Wakiilada JSL

**WAX-KA BEDELKA IYO KAABISTA LIFAAQA U AH**  
**XEERKA DOORASHADA MADAXTOOYADA IYO GOLEYAASHA**  
**DEEGAANKA**  
**(XEER Lr.20/2001)**  
**LIFAAQA 5AAD**

Wax-ka bedelka iyo/ama Kaabista Xeerka Doorashada Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanku waxa uu saamayn ku yeelanaya Qodobka 7aad, Faqraddiisa 1aad ee lifaaqa 3aad ee xeerka, Qodobka 9aad ee Xeer Lr.20/2001 iyo Qodobada 22aad iyo 24aad ee Lifaaqa 4aad ee xeerka .

**Qodobka 7aad**  
**Shagaalaha iyo Hay'adaha Dawliga ah**

Qodobka 7aad ee Lifaaqa 2aad ee Xeerka oo waajibinaaya in muddada uu shaqada ka tagaayo qofka Shagaalaha Dawladda ah ee isu sharraaya Doorashooyinka Deegaanka iyo Madaxtooyadu ay tahay "Lixdan (60) maalmood ka hor taariikhda qabashada doorashada" 2 Waa la bedelay waxaana loo bedelay: "Sagaashan (90) maalmood kahor taariikhda qabashada doorashada"

**Qodobka 9aad**  
**Goobaha Codbixinta**

Qodobka 9aad ee xeer Lr.20/2001 waxaa lagu kordhiyay Faqrud 4aad, 5aad iyo 6aad oo u dhigan sidan hoos ku xusan:

3) Haddii degaano dalka ka mid ah ay la soo gudboonaato duruufu culus ama xaalado aan saamaxayn in doorasho ka qabsoonto, waxaa soo qiimaynaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyagoo kala tashanaaya Xukuumada iyo Xisbiyada/Ururada Siyasadda;

4) Goobaha Codbixinta ee ay doorashadu ka qabsoomi waydo , tirada kuraasida loo qoondeeyay goobahaas waxay Xisbiyadu /Ururadu u kala qaadanayaan saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee Degmada;

5) Haddiise ay doorashadu ka qabsoomi waydo Degmo dhan,waxa ay Axsaabtu/Ururadu kuraasida Degmadaas u kala qaadanayaan

saami u dhigma sida ay u kala heleen wadarta guud ee codadka ansaxay ee Gobolka. Wuxaan loo raacayaa sida magacyadoodu ay liiska ugu kala horreyaan.

### Qodobka 22aad Habka Doorashada

Waxaa la bedelay Qodobka 22aad ee Lifaaqa 4aad ee xeerka oo dhigaaya:

“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaan, waa in uu Komishanka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in Komishanku siiyaa murashax kasta astaan u gaar ah”

Wuxaan loo bedelay:

“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaanka, waa in uu Komishanka Doorashooyinka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku sar-go'an tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane oo ku salaysan Habka Liistada Furan (Open List System). Waxa komishanka Doorashooyinka Qaranku uu siin doonaa murashax kasta lambar u gaar ah oo u noqon doona summad”.

### Qodobka 24aad Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta

Waxaa la bedelay Qodobka 24aad, Faqradiisa 1aad, 2aad iyo 3aad ee Lifaaqa 4aad ee Xeerka oo dhigaaya:

1. Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.
2. Xisbi/Ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur kale hore ugu isticmaalay doorasho hore .
3. Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, hase yeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo

Waxaa lagu bedelay:

“Lambarrada murashaxiinta ee Ururrada/Xisbiyadu waa in ay kala duwanaadaan marka la soo bandhigaayo, iyadoo la raacaayo habka uu Komishanku u soo dhigay”

### Qodobka 66aad

Adeegsiga iyo Dhaqan-galka Wax- ka –bedelka iyo Kaabista  
Xeerka Doorashooyinka  
Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr.20/2001 iyo  
Lifaagyadiisa

Wax-ka- Beddelka iyo kaabista Xeer Lr.20/2001 iyo Lifaagyadiisa 3aad iyo 4aad waxa uu dhaqan-gelayaan marka Goleyaasha Sharci Dejintu ansixiyaan ee uu Madaxwaynuhu Saxeexo.

C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)  
C/isaac Sicilid Abuyaale guddoomiyaha golaha sakiilada jil  
Xoghayaha guud ee golaha sakiilada

## **SIXID Lifaqa Afraad ee Xeerka**

### **Doorashooyinka**

#### **Goleyaasha Deegaanka iyo Madaxtooyada**

**Xeer Lr. 20/2001 ee ku soo baxay Cadadkii**

#### **7aad ee Faafinta**

Sixid lagu sameeyay lifaaqa 4aad ee Xeerka Doorashooyinka Madaxweynaha iyo Goleyaasha Deegaanka, Xeer Lr.20/2001, Xeerkaas oo isagoo khaladaad ku jiro ku soo baxay Faafinta Rasmiga ah Cadadkeeda 7aad.

Khaladaadkaas oo ay ka mid ahaayeen qodobada 22aad, 24aad iyo 45(2). oo ay wada qornaayeen wixii laga badalay iyo wixii loo badaley labaduba, isla markaana Xeerka Asalkiisu uu dhigayo wixii loo badaley qodobadaas oo keli ah.

Sidaas darted waxaanu ku soo saarney Qodobadaas oo sax ah cadadka 8aad eeFaafinta Rasmiga ah.

#### **Qodobka 22aad oo u soo baxay sidan;**

#### **Habka Doorashada**

Waxaa la beddelay Qodobka 22aad, Faqraddiisa 1aad eeLifaqa 3aad ee Xeerka oo dhigaaya:

**“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qayb galo doorashada Goleyaasha Deegaan, waa in uu Komishanka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirade kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, waana in Komishanku siyyaa murashax kasta astaan u gaar ah”**

Waxaana loo beddelay:

**“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qaybgalo doorashada Goleyaasha Deegaanka, waa in uu Komishanka Doorashooyinka Qaranka u gudbiyo liiska murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku sar-go'an tirade kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah oo ku salaysan Habka Liistada Furan (Open List Sytem). Waxa Komishanka Doorashooyinka Qaranku uu siin doonaa murashax kasta Lambar u gaar ah oo u noqon doona summad”.**

Waxaa la tirtiray Qodobka 22aad Faqraddiisa 2aad ee Xeerka, laynka labaad oo u qoran:

**“Tirada dadka liiska lagu qorayaa waa in aanay ka yaraan laban-laab xubnaha laga doonayo in degmo kasta laga soo doorto”**

**Wuxuu sax ku yahay sidan;**

## **Qodobka 22**

### **HabkaDoorashada**

**“Xisbi/Urur kasta oo doonaaya in uu ka qayb galo doorashada Goleyaasha Deegaan, waa in uu Komishanka Qaranka u gudbiyo liiska**

*murashaxiinta uu u xulay inay uga tartamaan doorashada oo degmaysan, kaas oo ku salaysan tirada kuraasida Degmo kasta loo xadiday, una qoran si taxane ah, oo ku salaysan habka liistada furan (open list system) waana in Komishanku siiyaa murashax kasta astaan u gaar ah”*

Waxaa la tirtiray Qodobka 22aad Faqraddiisa 2aad ee Xeerka, laynka labaad oo u qoran:

**“Tirada dadka liiska lagu qorayaa waa in aanay ka yaraan laban-laab xubnaha laga doonayo in degmo kasta laga soo doorto”**

### **Qodobka 24aad oo u soo baxay sidan;**

#### **Astaamaha Liistooyinka Murashaxiinta**

Waxaa la beddelay Qodobka 24aad, Faqraddiisa 1aad, 2aad iyo 3aad ee Xeerka oo dhigaaya:

1. *Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.*
2. *Xisbi/ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur kale hore ugu isticmaalay doorasho hore.*
3. *Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, haseyeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo*

Waxaa lagu beddelay:

**“Lambarrada murashaxiinta ee Ururrada/Xisbiyadu waa in ay kala duwanaadaan marka la soo bandhigaayo, iyadoo la raacaayo habka uu Komishanku u soo dhigay”.**

### **Wuxuu sax ku yahay sidan;**

## Qodobka 24

### Astaamaha Liistooinka Murashaxiinta

1. *Astaamaha liisaska murashaxiinta ee ururada/xisbiyada ka muuqdaa waa inay kala duwanaadaan marka la soo bandhigayo.*
2. *Xisbi/ururna waa in aanu isticmaalin astaan uu xisbi/urur kale hore ugu isticmaalay doorasho hore.*
3. *Astaantu waa in ay ahaato mid gaar ah oo muujinaysa sumadda aqoonsiga, haseyeeshee waa in aanay ka muuqan calaamado dawladeed, qabyaaladeed ama dariiqo*

### Qodobka 45(2) oo u soo baxdey sidan;

#### Tallaabooinka Ka Horreeya Cod-bixinta

2. *Goobta cod-bixineed ee cod-bixiyeyaashhoodu ka bataan 750 codbixiye waxa 317 loo kala jabinayaa (qaybinayaa) laba sanduuq oo ah A & B.*

**Waxay sax kutahaysidan;**

#### Qodobka 45aad

#### Tallaabooinka Ka Horreeya Cod-bixinta

*Goobta cod-bixineed ee cod-bixiyeyaashhoodu ka bataan 750 codbixiye waxa loo kala jabinayaa (qaybinayaa) laba sanduuq oo ah A & B.*

**QAYBTA LABAAD:**  
**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO**  
**DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:**

JSL/M/XERM/249-1246/082012

04/08/12

**XEER MADAXWEYNE Lr:**

**0253/082012**

**Magacaabid**

**Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa  
2aad ee Dastuurka  
Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda weyn ay  
Wasiiradu u leeyihiiin Dalka  
yo Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: Baahida loo qabo Xallinta  
Khilaafka iyo habsami u

socodka Arrimaha  
nabadgelyada iyo siyaasadda  
ee Gobollada Bari ee JSL;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo abuuridda  
jagada Wasiiru-Dawlahaa  
Nabadaynta Arrimaha  
Gobollada Bariga ee JSL oo  
hoos iman doonta  
Madaxweynaha;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqooniisa iyo  
hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo  
magacaabay;

## Wuxuu qo'aansaday

In Mudane, Kayse Cabdi Yuusuf, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru-Dawlahaa Nabadaynta Arrimaha Gobollada Bariga ee JSL.

## Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

## **XEER MADAXWEYNE Lr:**

## **0254/082012**

# **Cafis Madaxweyne**

## **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka Ciqaabta Guud;
- Markuu Arkay: Qoraalka uu soo gudbiyey Xeer Ilaaliyaha Guud ee Ciidamada Qaranka;
- Markuu La Tashaday: Masuuliyiinta ay arrintani khusayso;
- Markuu Tixgaliyay: Talo soo jeedintii waftigii Wasiiradda ahaa ee ka soo laabtay Buhoodle;

### **Wuxuu Go'aansaday**

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo 68<sup>ka</sup> (Sideed iyo Lixdan) Maxbuus ee ku qeexan qoraalka lifaaqa.

Allaa Mahad Leh,

**Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

**Liiska Maxaabiista Dagaalka ee ku xidhan Xabsiga Gobolka M/Jeex ee Hargeysa.**

S/N	Magaca Maxbuuska	DDL	Qodobka	T/Xadhiga
01	CQ, Axmed Sugule Mahad	026/12	150,133,64 XCCN	09/02/2012
02	" Max'ed Xandule Cumar	" "	" "	" "
03	" Cabdi Xasan Nuur	" "	" "	" "
04	" Faarax Digaale Jaamac	" "	" "	" "
05	" Cumar Cabdi Xasa	" "	" "	" "
06	" Cali Aadan Ducaale	" "	" "	" "
07	" Jaamac Rashiid Saleban	" "	" "	" "
08	" Faysal Cawil Seeri mire	" "	" "	" "
09	" C/fataax Sh, Saleebaan	" "	" "	" "
10	Shibil, Mustafe Cali Max'ed	026/12	150,133,64 XCCN	10/02/2012
11	" C/rashid Saleban Khalif	028/12	64 XCCN	15/02/12
12	" Faarax Nadiif Aadan	030/12	" "	06/04/12
13	Cabdi Faarax Biixi	030/12	64 XCCN	" "
14	Max'ed Axmed Max'ud	030/12	" "	" "
15	Xasan Jaamac Max'ud	030/12	" "	" "

16	Max'ed Abshir Ismaaciil	030/12	" "	" "
17	Xamse Axmed Cabdi	030/12	" "	" "
18	Xamse yuusuf Cabdi	020/12	Dagaal	02/04/12
19	Ibraahim Max'ed Mux'ed	020/12	Dagaal	" "

## Liiska Maxaabbiista Dagaalka eek u xidhan Xabsiga Dhexe ee Mandheera

S/N	Magaca Maxbuuska	Magaca Hooyada	Da'da	DDL	Qodobka	Maxkamad	T/Xadhiga
01	Siciid Cabdi Cilmi	Caasha Jaamac	34Jir	22/12	1aad 223 XCCN	MCQ-D1-GB	02/04/201 2
02	Jaamac Maxamed Ismaacil	Caasha Cabdillahi	32 "	" "	" "	" "	" "
03	Saleebaan Cismaan Warsame	Fadumo Warsame	40 "	" "	" "	" "	" "
04	Maxamud Mawliid Maxamed	Fadumo Max'ud	20 "	" "	" "	" "	" "
05	Cabdi Xasan Dalmar	Sahra Warsame	32 "	" "	" "	" "	" "
06	C/xakuum Siciid Maxamuud	Safiya Axmed	36 "	" "	" "	" "	" "
07	C/fataax Caydiid Xuseen	Sahra C/Iaahi	28 "	" "	" "	" "	" "
08	C/raxmaan Axmed Xirsi	Weris Cali	35 "	" "	" "	" "	" "
09	Maxamed Ducaale Shire	Khadija Khalif	40 "	" "	" "	" "	" "
10	Cali Maxamed Xirsi	Hodan Ciise	25 "	" "	" "	" "	" "

## Liiska Maxaabiista Dagaalka eek u xidhan Xabsiga Dhexe ee Mandheera

S/N	Magaca Maxbuuska	Magaca Hooyada	Da'da	DDL	Qodobka	Maxkamad	T/Xadhiga
11	Cali Cumar Cabdi	Xalimo Suudi	21 Jir	22/12	1aad 223 XCCN	MCQ-D1-GB	02/04/201 2
12	Cumar Cali Faarax	Cawrala Aaden	40 "	"	" "	" "	" "
13	Ibraahim Maxamed Warsame	Safiya Aaden	34 "	"	" "	" "	" "
14	C/raxman Ismacil Cali	Faraw Axmed	21 "	"	" "	" "	" "
15	Maxamuud Ibrahim Yusuf	Shukri Cabdi	28 "	"	" "	" "	" "
16	Faarrax Maxamed Xasan	Caasha Guuleed	35 "	"	" "	" "	" "
17	Maxamed Xirsi Maxamuud	Faadumo Cali	38 "	"	" "	" "	" "
18	Saleebaan Muuse Ducaale	Ruun Maxamed	36 "	"	" "	" "	" "
19	Cabdillaahi Cabdi Maxamed	Xaawa Muuse	25 "	"	" "	" "	" "
20	C/risaaq Maxamed Daahir	Nadiifa Ismaacil	35 "	"	" "	" "	" "

## Liiska Maxaabbiista Dagaalka eek u xidhan Xabsiga Dhexe ee Mandheera

S/N	Magaca Maxbuuska	Magaca Hooyada	Da'da	DDL	Qodobka	Maxkamad	T/Xadhiga
21	C/Rashid Axmed Maxamud	Sahra Aaden	32 Jir	22/12	1aad 223 XCCN	MCQ-D1-GB	02/04/201 2
22	C/Iaahi Maxamed Xasan	Xaawa Cawad	23 "	"	" "	" "	" "
23	Cismaan Cabdilahi Cali	Mulaaxo Xasan	25 "	"	" "	" "	" "
24	Yuusuf Faarax Barre	Faadumo Axmed	22 "	"	" "	" "	" "
25	Axmed Dubbad Boos	Barni Warsame	55 "	"	" "	" "	" "
26	Maxamud Cabdi Axmed	Faadumo Muuse	23 "	"	" "	" "	" "
27	Faarax Cali Xasan	Nadiifo Aaden	45 "	"	" "	" "	" "
28	Ismaacil Maxamed Maxamud	Cawrala Jaamac	55 "	"	" "	" "	" "
29	Yuusuf Xasan Ciise	Faadumo Cilmi	50 "	"	" "	" "	" "
30	C/rashiid Maxamed Cali	Haweya Max'med	34 "	"	" "	" "	" "

## **Liiska Maxaabbiista Dagaalka eek u xidhan Xabsiga Dhexe ee Mandheera**

31	Mursal Xasan Ducaale	Caasha Cabdi	18 Jir	DDL	Qodobka	Maxkamad	T/Xadhiga
32	C/qadir Maxamed Jamac	Aamina Axmed	25 "	22/12	1aad 223 XCCN	MCQ-D1-GB	02/04/2012
33	Yaasiin Dalmar Maxamed	Cawrala Faarax	60 "	"	" "	" "	" "
34	Cali Jaamac Maxamed	Xawa Max'med	55 "	"	" "	" "	" "

## **Liiska Maxaabbiista Dagaalka ee ku Xidhan Xabsiga Gobolka T/Dheer ee Burco**

S/N	Magaca Maxbuuska	Magaca Hooyada	Da'da	DDL	Qodobka	Maxkamad	T/Xadhiga
01	Cali Cumar Cabdi	Xalimo Suudi	21 Jir	22/12	Q-1aad 223XCCN	MCQ-D1-GB	02/04/2012
02	Ibrahim Maxmed Warsame	Safiya Aaden	34 "	"	" "	" "	" "
03	Fu'aad Cabdi Xirsri	Nadiifa Axmed	19 Jir	"	" "	" "	" "
04	Jaamac Abshir Axmed	Fadumo Jamac	40 "	"	" "	" "	" "

**Liiska Maxaabista Dagaalka ee ku Xidhan Xabsiga Gobolka T/Dheer ee Burco**

S/N	<b>Magaca Maxbuuska</b>	<b>Magaca Hoyada</b>	<b>Da'da</b>	<b>DDL</b>	<b>Qodobka</b>	<b>Maxkamad</b>	<b>T/Xadhiga</b>
05	Maxamed Sidiiq Maxamud	Amina Maxmed	35 Jir	22/12	Q-1aad 223XCCN	MCQ-D1-GB	02/04/2012
06	C/risaaq Caydiid Xuseen	Sahra C/Iahi	20 "	" "	" "	" "	" "
07	Faysal Aaden Warsame	Xalimo Axmed	25 "	" "	" "	" "	" "
08	C/risaaq Caydiid Xuseen	Sahra Cabdillaahi	23 "				
09	Asad Goox Cawad	Muumina Farax	28 "	" "	" "	" "	" "
10	C/fataax Xasan Faarax	Luul Yuusuf	16 "	" "	" "	" "	" "
11	Iaamac Caydiid Ismaaciil	Aamina Muse	22 "	" "	" "	" "	" "
12	Xaamud Xasan Maxamed	Fadumo Cashur	46 "				
13	C/Iaahi Cali Ayax	Weris Aftaag	51 "	" "	" "	" "	" "
14	Xuseen Axmed Jaamac	Maryama Salad	40 "	" "	" "	" "	" "
15	C/raxman Dahir Gaas	Dhudi Cali	54 "	" "	" "	" "	" "

## XEER MADAXWEYNE LR: 0256/082012

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90<sup>aad</sup> ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland,

Markuu Arkay: Qodobka 8<sup>aad</sup> ee Xeerka Doorashooyinka Golayaasha Deegaanada iyo Madaxtooyada Xeer Lr: 20/2001,

Markuu helay: Go'aanka ay Guddiga Doorashooyinka Qaranku ku cayimeen in Doorashada Golayaasha Deegaanku qabsoonto Maalinta Arbacada ee 28<sup>ka</sup> bisha November 2012 oo ku beegan 14 Bisha Muxaram taariikhda hijriga.

### Wuxuu Soo Saaray

Yeerkana oo lagu baahinayo dhaqan-galka cayimaada  
WAKHTIGA DOORASHADA GOLAYAASHA  
DEEGAANADA oo la qaban doono Maalinta Arbacada  
28<sup>ka</sup> November 2012.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADEXAAD:  
**DIGREETOYINKA,**  
**WAREEGTOYINKA,**  
**AMARADA**  
**IYO XEER NIDAAMIYAYAASHA**  
**WASIIRADA, IWM**

*Jamhuuriyada Somaliland*      *Republic Of Somaliland*  
*Wasaaradda Arrimaha Gudaha*       *Ministery of interior*  
*QAYBTA SADEXAAD*

---

WAG/XW/869/72/2012

Date:26/08/2012

- KU:- *DHAMAAN GOLEYAASHA DEEGAANKA*  
*DEGMOOYINKA DALKA*
- KU:- *XOGHAYAYAASHA FULINTA EE DEGMOOYINKA*  
*DALKA*
- OG: *AGAASIMAH A HORUMARINTA DEGMOOYINKA*
- OG:- *GUDOOMIYAYAASHA GOBOLADA DALKA JSL.*
- OG:- *WASIIR-KU-XIGEENKA MAAMULKA GOB.&*  
*DEGMOOYINKA*
- OG:- *MADAXWAYNAHA JAMHUURIYADA SOMALILAND*

## **WAREEGTO WASIIR NO: 02**

***Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha ee JSL:***

**Markuu dhuuxay:** Qodobka 110 Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland iyo Qodobka 103 ee Xeerka Ismaamulka gobolada iyo Degmooyinka JSL oo cadaynaya in golayaasha deegaanku ka tirsan yihiiin xukummada

**Markuu arkay:** Amarka Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Somalilandoo ah Gudoomiyaha Golaha Wasiirada ujeediyey wasaarada arimaha gudaha kaas oo ku aadan hubinta in hantida umadda aan loo isticmalin ololaha doorashada

**Markuu arkay:** Qdobada 98 iyo 103 ee Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka oo awood u siinaya wasaarada Arimaha Gudaha baadhista hantida, Dawladaha Hoose iyo hubinta sida, Dawladaha Hoose u fulinayaan shuruucda iyo siyaasadda guud ee Qaranka

**Markuu arkay:** Qodobka 44aad ee Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka kaas oo farqadda (l) aay waajib kaga dhigay Xoghayasha Dawlada Hoose in ay sugaan ilaalinta hantida dawladda Hoose ee degmada, iyo farqadda (m) oo muujinaysa in xoghayayaasha Dawladaa hoose u xil saaran yahiin hubinta,

saxeexidda foojarada, jeegaga kharash bixinta iyo gelidda saxeexa codsiyada kharashaadka caadiga ah ee hawl socodsiinta maamulka degmada, uuna la eegay qodobka 45aad ee Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka

**Markuu eegay:** Qdobada 92aad, 98aad ee Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinkao awood u siinaya Wasaarada kormeerka iyo Baadhista maaliayada Dawladaha Hoose, iyada oo loo marayo nidaamka xisaabadka qaranka.

**Markuu eegay:** Qdobka23aad ee Xeerka Maaliyadda iyo Xisaabaadka Qaranka oo jideenaya in Wasiirku hakin karo qarashaadka miisaaniyaddha Dawlaha Hoose

**Markuu dersay:** Xaaladda Doorasho ee dalku gelayo iyo waajibka ka saaran Wasaaradda Arimaha Gudaha inay fuliso siyaasada guud ee qaranka iyo amarada Madaxweynaha isla markaana hubiso oo xaqijiso, in hantida umadda aan loo isticmaalin ololaha doorashada

**Markuu ka baarandegay:** Saamaynta ay ku yeelan karto xornimada iyo xalaalnimada doorashada hadii hantida Qaranka lagu isticmalo ololaha

## **Wuxuu Go'aamiyey.**

### **Qodobka 1aad.**

#### **Hakin**

In laga bilaabo maanta laga hakiyey ama aanay samayn Golayaasha Deegaanadu wax kasta oo keenaya miisaaniyad dheerad ah oo ay ka mid yihiiin:

- b. Sameynta xaraash amaba in ay bixiyaan hanti golaha deegaanku leeyahay.
- t. Sameynta shaqaale qoris, dalaciin, bedelid ama ruqsayn
- j. Magacaabid gudiyo ama saraakiil.
- x. In ay galaan heshiis Dawladda Hoose dhinac ka yihiiin
- kh. In ay bixiyaan ama qorsheeyaan dhul cusub.
- d. In ay galaan kharashaad ka baxsan kuwa joogtada ah sida mushaharka, gunada shaqaalaha, shidaalka IWM.

### **Qodobka 2aad.**

#### **Mashaariic**

In mashaariicda horumarineed ee u baahan in ay golayaasha deegaanku fuliyaan loo soo gudbiyaa Wasaaradda Arimaha Gudaha oo u xilsaaran sida ku cad qodobka 98 Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka jaangoynta, qorshaynta iyo maalgelinta mashaariiceed, waxaana loo soo gudbinayaa qorshaha mashruuc kasta Gudoomiyaha Gobolka oo ah Wakiilka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

### **Qodobka 3aad.**

#### **Dhaqan galka iyo mudada dhaqan galka Go'aanka**

1. Xeerkani waxa uu u dhaqan gelaya Degdeg laga bilaabo 26/08/2012, wuxuuna dhaqan gal ahaanayaa marka uu saxeexo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

### ***ALLAA MAHAD LEH***

## ***MAXAMED NUUR CARAALE (DUUR) WASIIRKA WASAARADDA ARRIMAHAD GUDAHAD***

## **QAYBTA AFRAAD: AMARADA & GO'AANADA MAAMUL**

Republic Of Somaliland

National Electoral Commission



Jamhuuriyadda Somaliland

Guddida Doorashooyinka Qaranka

REF: KDO/XK/267/2012

Taar: 12 August, 2012

### **GO'AAN KOMISHAN**

#### ***Komishanka Doorashooyinka Qaranku:***

**Markuu Arkay:** Qodka 8aad ee Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo Goleyaasha Deegaanka Xeer Lr. 20/2001 oo dhigaaya in Komishanku uu Cayimo Taarikhaha La qabanaayo Doorashooyinka si Waafaqsan Dastuurka, una soo gudbiyo Madaxweynaha si uu uga soo saaro Degreeto;

**Markuu Arkay:** Qodobka 14aad Faqradiisa 1aad ee Xeer Lr. 20/2001 oo mar labaad xoojinaya in uu

*Komishanku Awood u leeyahay in uu Cayimo Wakhtiga Doorashooyinka la Qabanayo, iyagoo Madaxweynaha u gudbinaaya si uu degreeto uga soo saaro*

**Markuu Arkay:** *Go'aankii Guddida Diiwaangelinta Urrurada Siyaasada iyo Ansixinta Axsaabta Qaranka ee Sumadiisu ahayd REF: GDU/AAS/127 soona Baxay 20 April, 2012 kaas oo ay ku caddayd Xisbiyada iyo Urrurada siyaasadeed ee u gudbay Doorashada dawladaha Hoose ee ka qayb geli kara Doorashada Goleyaasha Deegaanka*

**Markuu Arkay:** *In labada Gole ee Sharci Dejintu ay Ansixijeen Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeer Lr. 20/2001 Lifaaqa 5aad kaas oo aannu ku kalsoonyahay in Madaxweynuhu Uu Saxeexi Doono;*

**Isagoo Fulinaaya:** *Shuruucda ka soo baxday Goleyaasha Sharci-Dejinta isla markaana Tixgelinaya Rabitaanka Shacbiga iyo Muwaadiniinta isu Sharaxaysa Doorashooyinka Goleyaasha Deegaanka;*

## **KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKU:**

**WUXUU GO'AAMIYEEY SI RASMI AHNA U CAYIMAY**  
**MAALINTA LA QABAAYO DOORASHADA GOLEYAASHA**  
**DEEGAANKA JAMHUURIYADA SOMALILAND EE**  
**SANNADKA LABA KUN IYO LABA IYO TOBANKA (2012) OO**  
**UU U CAYIMAY IN AY QABSOONTO ARBACA 28**  
**NOVEMBER, 2012 (SIDEED IYO LABAATANKA NOVEMBER**  
**LABA KUN IYO LABA IYO TOBAN) OO LA FILAYO IN AY KU**

**BEEGANTO 14KA MUXARRAM 1434 EE TAARIKHDA**  
**ISLAAMKA (HIJRIYADDA)**

Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka:

1. Eng:Ciise Yusuuf Maxamed Gudoomiye.....
2. Cali-Khadar Xasan Cismaan G.Xigeen.....
3. C/Fatax Ibraahim Xasan Xubin.....
4. C/Raxmaan Maxamed Ismaacil Xubin.....
5. Maxamed Axmed Xirsi Geele Xubin.....
6. Faarax Abiib Aadan Faarax Xubin.....
7. Raabi Cabdi Maxamed Xubin.....